Shaqaalaha sharafta leh,

Ma hayno diiwaan difaac ah oo ku saabsan (ka hortagga) **measles, mumps, and rubella (MMR, jadeecada,** q**aamo-qashiirka, iyo rubeelada)** oo adiga kugu saabsan.

Dhammaan shaqaalaha iyo mutadawiciinta xarumaha daryeelka carruurta ee shatiga haysta waa inay bixiyaan midkood:

1. Diiwaanka tallaalka oo muujinaya inay heleen ugu yaraan hal kuuro oo tallaalka MMR ah.
2. Caddeynta difaaca jirka ee cudurka jadeecada (oo sidoo kale loo yaqaan baaritaanka dhiigga ama titer).
3. Dukumiinti ka yimid bixiyaha daryeelka caafimaadka oo sheegaya in qofku uu qabay cudurka jadeecada oo ku filan inuu bixiyo difaac ka dhan ah jadeecada; ama
4. Shahaado qoran oo uu saxiixay dhakhtar caafimaad oo shati haysta oo sheegaya in tallaalka MMR uusan ahayn mid lagula talinayo qofka.

Ka-dhaafitaan shaqsiyeed, falsafad ama diimeed oo loogu talagalay MMR looma oggola shaqaalaha xarunta daryeelka carruurta.

Haddii uu **cudur jadeeco ah** ka dillaaco barnaamijkeenna, ama bulshada dhexdeeda, waaxda caafimaadku waxay uga baahan kartaa qof kasta oo aan muujin karin caddayn difaac ah oo ku saabsan jadeecada inuu **guriga joogo ilaa 21 maalmood** kadib markii ugu dambeysay ee uu soo gaaray cudurku. Tani waxay gacan ka geysataa joojinta faafitaanka jadeecada.

Jadeecadu aad bay u faaftaa si dhakhso ah ayayna u faafi kartaa. Waxay sidoo kale sababi kartaa dhibaatooyin caafimaad oo halis ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo Washington State Department of Health (Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington): doh.wa.gov/measles.

Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad la hadasho bixiyahaaga daryeelka caafimaadka haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan jadeecada.

Si daacadnimo leh,